Macaluul ayaa ku fidday Gobolka Baay; ilaa 750,000 qof ayay soo waajahday gaajo

Sahan ku saabasan dhinaca nafaqada oo laga sameeyey Gobolka Bay ee koonfurta Somaliaya, bishii sideedaad ee sanadka 2011 wuxuu muujinayaa in heerka nafqada darada iyo dhimashado ay dhafeen xadka lagu cabirio nafaqa darada. Warbixiintii ka soo baxday sahankii Guga dabaddii ee Qaybta Falanqeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) waxay tilmaamaysaa in qoysaska saboolka ah ee ku nool gobolka Bay ay soo wajahaday cunto yari ay sababtay wax soo saarkii medhaha beeraha oo ba'ay iyo awoodii wax iibsiga oo wiiqantay. Sidaas awgeed, Qaybta Falanqeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada(FSNAU) oo hoos tagta Hayada Cuntada iyo Beeraha ee Adduunka (FAO) oo aay wehliso Hayada hor-u-digidda macluusha(FEWSNET) ayaa hadda ku qiimeyey in uu ku jiro Gobolku heerka shanaad ee saafidda is-ku – dhafka cunna yari ee hab nololeedyda (IPC-ga) oo tilmaamaya macaluul. Gobolkani wuxuu ku biiray gobolada Bakool Shabellada Hoose oo galay heerka macaluusha 20kii bishii toddobaad ee sanadka 2011. Waxa kale oo jirta inay soo waajaday cunto yari iyo macluul ; Beero-xoolo dhaqatada Balcad iyo Cadale ee Gobolka Shabeelaha dhexe, Barkacayaasha degan Afgooye iyo Xamar dhexdooda iyo Barakacayaasha ku sugan Xamar oo heer macaluusha ku biiray 3dii bisha siddeedad ee sanadkan 2011 iyo sidoo kale ilaa 50,000 oo qof oo ka kala socda beeralayda Gobollada Gedo iyo Jubba iyo Xoola dhaqatada Bakool oo ku darsamay. Ilaa 4 milyan oo qof oo Somali ahayaa ku sugan heer nolol xumo. Waxa la sadaalinyaa in 750,000 oo qof oo ka mid ah 4ta milyan ay qarka u saran yihiin dhimasho afarta bilood ee soo socota haddii aanay helin kaalmo ku filan oo deg deg ah. Tobonaan kun oo qof ayaa hore u dhintay oo kala badh ay yihiin caruur. Iyadoo maanka lagu hayo in kaalmadu sii socondoonto, hadana waxa la filyaa in macaluushu sii fidi doonto 4ta bilood ee soo socota.

Xaaladda nolosha adag ee hadda ka tagaan koonfurta Somaliya wax keenay xaalado isbiirsaday oo ay ka mid yihiin robabkii deeyrta oo aan la helin iyo Gugii ka dambeeyay oo isna liitey, taasoo keentay wax soo saar sanadkan in uu noqdo kii ugu xumaa muddo ku siman 17 sano, iyadoo taasi aay weheliso helitaankii shaqada oo yaraatay, qiimihii xoola oo hoos udhacy iyo dhimashadii xoolaha oo badatay. Helitaanka geleyda iyo messagda oo suuqayada ku yaraatay waxay iyana keentay inuu kaco qiimihii dalagyadaas, taasoo ay ugu sii darantay hoos u dhac ku yimi qiimihii xoolaha iyo tacab goosigii oo sababay hoos u dhac xoogan oo ku yimi awoodii wax iibsiga ee habnoleedyada oo dhan. Barakaca baahsan iyo xanibaada gargaarka bini'adnimo ayaa sii xumeeyey helitaan cuntada iyo xaalada caafimaad ee dadkaa tabaaleysan

Iyada oo laga duulayo cabirka habka iskudhafan ee kala dheehidda Sugnaanta cuntada, waxa lagu qeexaa heerka macluusha marka ugu yaraan ay boqolkiiba 20 ee dad weynuhu ay ku sugan yihiin xaalad aad u liidata ee dhinaca cuntada, heerka nafaqa dariduna ay ka badan tahay boqolkiiba 30 iyo dhimashada dadkuna ay ka badan tahay 2 qof kunkiiba maalintii dad weynaha oo dhan. Marka loo eego xaaladda hadda taagan waxa jira arrimaha soo socda:

- Qimaha firileyda wadaniga ah ee suuqyada koonfurta ayaa aad uga sareeya inta dhexdhexaadka ah, in ka badan sadex jibaar qiimaha 2010 meelaha qaarkood. Qiimahan aadka u sareeyaa waxa uu wiiqay qiimaha xoolaha iyo heerka tacab goosiga, taas ooo waliba ay weheliso bi'idda beeraha oo sababtay inay cuntadu gabaabsi ku noqoto qoysaska saboolka iyo sabool xigeenka ah, khaas ahaan deegaanada wax beerahshada ee nugul.

- Bilihii 7aad iyo 8aad, FSNAU waxay fulisay 34 daraasad ku saabsan heerka nafaqada iyo dhimashada ee gobolada koonfureed ee Soomaaliya, oo 30 ka mida ah laga qabtay dhulka ay ku sugan yihiin dadka aan barakacayaasha aheyn, afarna goobaha ay ku sugan yihiin barakacayaashu. Natiijooyinka ka soo baxay 24 daraasadood way yaalaan. Tiiyoo lagu salaynayo xogaha cusub ee laga keenay ama ururiyay gobol kasta, heerka celceliska ee GAM waxa uu noqday 36.4 boqolkiiba halka uu ka noqday heerka banaanta nafaqo darida (SAM) 15.8 boqolkiiba. Heerka ugu sareeya ee SAM waxa laga diiwaan geliyey gobolka BAY, halka heerkiisa GAM na noqday 58.3 boqolkiiba. Xarunta dhexe ee hubisa ama xakameysa cudurada ee dalka Mareykanka way sugtay natiijooyinkan.

- Heerka dhimashada ee bulshaweynta way ka sareysaa heerka digniinta ah (1 qof/10,000 qof/maalintii) gabi ahaanba gobolada koonfurta, wayna ka sareysaa heerka cabirka macaluusha (Famine) (2 qof/10,000 qof/maalintiiba) gobolada bay, Bakool iyo xoolo-beeraleyda ee gobolka Shabeelaha Dhexe (Balcad iyo Cadale). In ka badan labalaabka heerka cabirka macaluusha waxay laga diiwaangeliyey gobolka Shabeelaha Hoose iyo deegaanada barakacayaasha ee inta u dhexeysa Afgooye iyo Muqdisho. Tobanaan kun oo dad ah ayaa dintay sadexdii bilood ee tagay heerka dhimashada caruurta dadoodu ka yar tahay shan sano waxay ka sareysaa 4 cunug/10,000 cunug/maalintii dhammaan deegaanada koonfurta marka laga reebo deegaanada xoolo dhaqatada Jubooyinka. Heerka dhimashada caruurta dadoodu ka yar tahay shan sano waxay la mid tahay ama ka badan tahay 13 cunug/10,000 cunug/maalintiiba (u dhiganta 10 boqolkiiba caruurta dadoodu ka yar tahay shan sano oo dhimanaya 11 cusuboocba) ee deegaanada diilka webiyada iyo xoolo-beeraleyda ee Shabeelada Hoose iyo barakacayaasha ku sugan inta u dhexeysa Afgooye iyo Muqdisho.

- Heerarka gurmadka ee nafaqo darida iyo dhimashadu way ku xoogan tahay xeryaha qaxootiga ka baxsan xadka. Xaaladaha xeryaha cusub ee koonfurta Itoobiya waa laga deyrin, taas oo heerka nafaqo darida ka sareyso 30 boqolkiiba ta heerka dhimashaduna la filayo inay ka badan tahay 2 qof/10,000 qof/maalintiiba, halkaas oo waliba yaallo raashin deeqah oo ku filan.

Iyadoo lagu xisaabtamayo heerka gargaarka baniáadamanimo iyo dhexdhexaadnimada roobabka xilliga *Deyr* ee biliha 10aad illaa 12aad, ayaa waxa la filayaa in uu ka sii daro xaaladda sugnaanta cuntada taas oo weheliso heerka baán ee nafaqada (SAM) iyo dhimashada caruurta dadoodu ka hooseyso shan sano, saadaasha in ay dilaacaan cudurada duumada iyo jadeecadu, fursad yarida gargaarka baniáadaminimo, biídda beeraha ee xilligii Guga, kor-u-kaca qiimaha bariiska ee heer caalami iyo sii korodhka qiimaha fireleyda ee dalka. Illaa bisha 12aad 2011, macaluushu waxa laga yaabaa inay ka sii jirto deegaanada xoolo-beerleyda iyo diilka webiyada ee gobolada Gedo iyo Jubooyinka iyo deegaanada xoolo-beeraleyda ee gobolada Shabeelaha Dhexe iyo Hiiraan.

Taaguleyn aad u xoogan oo dhan walba ah waa lagam maarmaan si ay u xakeymayso ama hagiso inay dad kale sii dhintaan iyo hab nololeed dun ama xidhiidh bulsheed dun. Gargaarka iyo taakuleyn deg-dega ah si loo badiyo fursad helidda cuntada iyo adeegyada caafimaad waa muhiim loona baahan yahay.Xilliga mudada gaaban, taakuleynta iyo gargaarka lagu kaalmeynayo dibna llogu dhisayo hab nololeedyada waa wax-ku-ool. Talaabooyi wax-ku-ool ah oo ku saabsan gargaarka iyo taakuleynta waa in la qabtaa ama la fuliyaa. Kaalmadan baaheyeed waan inay jirtaa 2012.

FSNAU iyo FEWS NET way sii wadayaan u kuur galka xaladaha iyo natiijooyinka, falaqeynta iyo warbixinada ku saabsan hadda iyo odoroska ee heerarka sugnaanta cuntada iyo nafaqa darida. Si wada jir ah waxa la soo saari doonaa warbixin ku saabsan sugnaanta cuntada iyo nafaqada tobankii maalimoodba mar. Way socon doonaan daraasadaha ku saabsan heerka nafaqada iyo dimashada gobolada koonfureed ee Soomaaliya, taas oo lagu ladhi doono daraasad ku saabsan sugnaanta cuntada oo dhici doona bilaha 9aad/10aad.falaqeyntan wada jireed ee odoroska sugnaanta cuntada illaa bisha 3aad, 2012 waxa la soo saari doonaya dabayaaqada bisha 10aad 2011. Dhammaan xogaha waxa laga heli karaa shabakadaha kala ah: www.fews.net iyo www.fsnau.org.